Xuquuqda Dadka Naafada ah ee DCYF

Ogow xuquuqdaada iyo sida aad u codsan karto caawimaad.



Tilmaamahan wuxuu bixinayaa dulmar guud oo ku saabsan xuquuqdaada qof naafo ah oo ka qayb qaadanaya barnaamijyada iyo adeegyada uu bixiyo qofka naafada ah Washington State Department of Children, Youth and Families (Waaxda Carruurta, Dhallinyarada iyo Qoysaska, DCYF). Waxaa ku jira macluumaad ku saabsan noocyada naafanimada, xuquuqdaada helitaanka adeegyada, qalabka lagu fududeeyo isgaarsiinta, iyo agabka kale ee waxtarka leh. Waxa kale oo ay sharraxaysaa sida cabasho loo gudbiyo haddii aad aaminsan tahay in si caddaalad-darro ah lagula dhaqmay naafanimadaada awgeed.

DCYF waxay ka go'an tahay inay ilaaliso xuquuqda dadka naafada ah, iyadoo la raacayo shuruucda heer gobol iyo heer federaal.

DCYF dadka naafada ah si caddaalad-darro ah umala dhaqanto (ma takoorto). **Shaqada aan la yeelanno qoysaska, DCYF waxay:**

- Dadka naafada ah ula dhaqan shakhsi ahaan, iyadoo la eegayo xirfadahooda iyo baahiyahooda.
- Dadka naafada ah la hadal ama u qor farriimo hab ay fahmi karaan.
- Beddel ama wax ka beddel adeegyada si loo daboolo baahiyaha dadka naafada ah (waxa kale oo tan loo yaqaannaa bixinta wax-ka-beddelo ama habayn macquul ah).

Ma I Khuseeyaa?

Sida sharcigu dhigayo, waxyaabo badan ayaa loo tixgeliyaa "naafanimo," kuwaas oo laga yaabo inaadan filanayn. Naafanimada qaarkood waad arki kartaa, kuwa kalena ma arki kartid. **Tusaalooyinka qaar ee naafanimada waxaa ka mid ah**:

- Naafanimada wax-barashada, sida dhibka akhriska ama dhibka qorista.
- Naafada garaadka iyo korriinka, sida autism spectrum disorder (cilladda spectrum-ka autism-ka, ASD).
- Naafanimada xubnaha dareenka, sida maqal la'aanta ama aragga oo liita.
- Naafanimada caafimaadka dhimirka, sida post-traumatic stress disorder (cilladda walwalka ee ka dhalata dhacdo naxdin leh, PTSD), niyad-jabka daran, ama dhibaatooyinka la xiriira isticmaalka maandooriyaha.
- Naafanimada dhanka dhaqdhaqaaqa, sida kuwa u baahan isticmaalka qalabka lagu socdo (walker), usha lagu tiirsado, ama kursiga curyaamiinta.
- Qaar ka mid ah xaaladaha caafimaad, sida kansarka, sonkorowga, suuxdinta, traumatic brain injury (dhaawac maskaxeed oo daran, TBI), ama human immunodeficiency virus (fayraska difaac-yaraanta aadanaha, HIV).

Waa maxay wax-ka-beddelrada macquulka ah iyo qalabka lagu fududeeyo isgaarsiinta?

A **Wax-ka-beddel macquul ah** waa isbeddel ku yimaada siyaasadda ama hab-dhaqanka DCYF, kaas oo ka caawin doona qofka naafada ah inuu ka faa'iidaysto adeegyada hay'adda.

Qalab ama adeeg isgaarsiineed waa hab lagu xiriiro (iyadoo la hadlayo ama la qorayo) dadka qaba naafanimada (sida dhibaatooyinka dhageysiga, hadalka, ama aragga).

Waxaa jira isbeddello kale oo badan, qalabka lagu fududeeyo isgaarsiinta, iyo adeegyo aad codsan karto iyadoo ku xiran naafanimadaada. **Waxaa ka mid ah:**

- Turjumaan luuqadda calaamadaha ah ama adeegyada CART (qoraal-muujin waqtiga dhabta ah).
- Xasuusin ku saabsan kulamada ama ballamaha DCYF.
- Agabka muuqaalka ah, sida jadwalka booqashooyinka soo socda, kulamada DCYF, ama ballamaha ilmahaaga.
- Tababar ku saabsan xirfadaha waalidnimada, ama adeegyo kale oo loo baahan yahay, kuwaas oo diiradda saaraya awoodahaaga gaarka ah iyo baahiyahaaga taageero.

- Beddelidda inta jeer, muddada, ama goobta aad kula kulanto ilmahaaga, si aad ugu dhaqangeliso una muujiso xirfadaha waalidnimo ee aad baratay.
- In qorshayaasha la xiriira kiiska lagu qoro luqad kooban oo fudud.

Haddii aadan hubin nooca wax-ka-beddelka, caawimaadaha, iyo adeegyada aad uga baahan tahay DCYF, waxaad kala hadli kartaa qareenkaaga ama qofka kuu doodaya. Waxaad sidoo kale weydiisan kartaa qof ka baxsan DCYF, sida bixiyaha daryeelka caafimaadka ama dad kale, inay qiimeeyaan waxyaabaha laga yaabo inaad u baahan tahay.

Haddii aad ka codsato DCYF inay sameeyaan wax ka beddel, ama aad codsato qalab ama adeeg isgaarsiineed—sida turjumaan luuqadda-calaamadaha ah, qoraal-muujin toos ah, iyo wixii la mid ah—**DCYF waxay**:

Waxaan dib u eegi doonnaa codsigaaga, waxaana kula soo xiriiri doonnaa muddo toban (10) maalmood oo shaqo gudahood ah si aan uga wada hadalno codsigaaga.

Go'aami in hay'addu ay bixin karto waxaad codsatay, ama ay kuu soo bandhigi karto beddel la mid ah.

Weydii su'aalo si aad si fiican u fahanto waxa ay u baahan yihiin, iyo isbeddellada ama wax-ka-beddelka ugu habboon iyaga.

Waxaa jira naafonimooyin kale oo badan oo aan ku xusnayn dukumeentigan. Haddii aad u malaynayso in wax-ka-beddel ama qalabka isgaarsiinta lagu caawiyo ay ku tari karaan, fadlan kala hadal mid ka mid ah dadka hoos ku xusan:

Xiriirrada:

- Shaqaale kiis laguu xilsaaray ama kormeerahooda
- Shaqaale kasta oo ka tirsan DCYF oo ku caawiya
- Barnaamijka Helitaanka ee ADA
  - **TELEFOON:** 360-480-7230, Isticmaalayaasha adeegga 'Relay' ha wacaan 7-1-1
  - **TELEFOONKA MUUQAALKA:** 360-200-8524
  - **IIMEEL:** **dcyf.adaaccessibility@dcyf.wa.gov**
  - **MAREKTA SHABAKADDA::** **www.dcyf.wa.gov/ada**
  - **BOOSTADA:** P.O. Box 4008, Olympia, WA 98504-0983

Daryeelka Ilmaha

Sidee baan u codsan karaa wax-ka-beddel ama qalab lagu fududeeyo isgaarsiinta oo la xiriira daryeelka carruurta?

Haddii aad ku lug leedahay kiis Daryeelka Carruurta oo ay la socoto DCYF oo aad u malaynayso inaad u baahan tahay isbeddel macquul ah (wax ka beddel) ama gargaar isgaarsiineed sababtoo ah naafanimadaada, waxaad la hadli kartaa mid ka mid ah xiriirada liiska ku jira. Intaa waxaa dheer, xiriiriyeyaasha gobolka ee arrimaha naafada ee halkan ku xusan, iyo sidoo kale Maamulaha Aagga ee Daryeelka Carruurta (maareeyaha xafiiska).

Mas'uulka gobolka u qaabilsan arrimaha naafada, ee u adeega gobolkaaga:

Xiriiriyaha Arrimaha Naafada ee Waaxda Daryeelka Carruurta (Gobolka 1)
dcyf.cwreg1disabilityliaison@dcyf.wa.gov

– **Degmooyinka la Adeego:** Adams, Asotin, Chelan, Douglas, Ferry, Garfield, Grant, Lincoln, Okanogan, Pend Oreille, Spokane, Whitman

Xiriiriyaha Arrimaha Naafada ee Waaxda Daryeelka Carruurta (Gobolka 2)
dcyf.cwreg2disabilityliaison@dcyf.wa.gov

– **Degmooyinka la Adeego:** Benton, Columbia, Franklin, Kittitas, Klickitat, Yakima, Walla Walla

Xiriiriyaha Arrimaha Naafada ee Waaxda Daryeelka Carruurta (Gobolka 3)
dcyf.cwreg3disabilityliaison@dcyf.wa.gov

– **Degmooyinka la Adeego:** Island, San Juan, Skagit, Snohomish, Whatcom

Xiriiriyaha Arrimaha Naafada ee Waaxda Daryeelka Carruurta (Gobolka 4)
dcyf.cwreg4disabilityliaison@dcyf.wa.gov

– **Degmooyinka la Adeego:** King

Xiriiriyaha Arrimaha Naafada ee Waaxda Daryeelka Carruurta (Gobolka 5)
dcyf.cwreg5disabilityliaison@dcyf.wa.gov

– **Degmooyinka la Adeego:** Kitsap, Pierce

Xiriiriyaha Arrimaha Naafada ee Waaxda Daryeelka Carruurta (Gobolka 6)
dcyf.cwreg6disabilityliaison@dcyf.wa.gov

– **Degmooyinka la Adeego:** Clallam, Clark, Cowlitz, Grays Harbor, Jefferson, Lewis, Mason, Pacific, Skamania, Thurston, Wahkiakum

Sidee baan u gudbin karaa cabasho la xiriirta takoorka dadka naafada ah ama ku guuldareysiga in la sameeyo wax-ka-beddelo macquul ah?

Waxaad gudbin kartaa cabasho haddii aad u malaynayso in DCYF aysan samayn isbeddellada macquulka ah ee la codsaday si aad u isticmaali karto adeegyada hay'adda, ama haddii aad u malaynayso in DCYF ay si caddaalad-darro ah kuula dhaqantay sababo la xiriira naafanimadaada. Fadlan buuxi foomka Cabashada Xuquuqda Madaniga ah ee DCYF, oo lagu heli karo luqado badan **https://dcyf.wa.gov/forms?field_number_value=05-065&title=**. Haddii aad u baahan tahay caawimaad, Barnaamijka Helitaanka ee ADA ee DCYF ayaa kaa caawin kara buuxinta foomka cabashada ee xuquuqda madaniga ah.

Si aad wax badan uga ogaato sida DCYF u maamusho cabashadaada, fadlan booqo bogga 'Habka Cabashooyinka Xuquuqda Madaniga ah ee DCYF' oo ku yaalla **www.dcyf.wa.gov/accessibility-equity/file-complaint**.

DCYF aargoosi kuma samayn doonto, mana ciqaabi doonto, haddii aad codsato wax-ka-beddel ama aad gudbiso cabasho. Aargoosigu wuxuu xad-gudub ku yahay sharciyada xuquuqda madaniga ah ee heer gobol iyo heer federaal. Haddii aad aaminsan tahay in qof ka tirsan DCYF uu tallaabo aargoosi ah kaa qaaday sababtoo ah waxaad u baahatay caawimaad la xiriirta naafanimadaada, ama sababtoo ah waxaad gudbisay cabasho, fadlan eeg liiska xiriirrada ee hoose.

Qasab kuguma aha inaad cabasho u gudbiso DCYF. Waxaad xaq u leedahay inaad cabashooyinka si toos ah ugu gudbiso mid ka mid ah hay'adaha hoos ku xusan:

Washington Office of the Family and Children's Ombuds (Xafiiska Washington ee Guddoomiyaha Xuquuqda Qoyska iyo Carruurta, OFCO)
MAREEG:https://ofco.wa.gov

FOOMKA CABASHADA: https://ofco.dynamics365portals.us/complaint-form

TELEFOON: 1-800-571-7321 (isticmaalayaasha adeegga dhexdhexaadinta waxay wici karaan 7-1-1)

U.S. Health and Human Services Department (Waaxda Caafimaadka iyo Adeegyada Aadanaha, HHS), Xafiiska Xuquuqda Madaniga ah –
BOGGA INTERNETKA: www.hhs.gov/civil-rights/index.html

BOGGA CABASHOOYINKA EE INTERNETKA: https://ocrportal.hhs.gov/ocr/smartscreen/main.jsf

FOOMKA CABASHADA (boostada ama iimaylka):
www.hhs.gov/sites/default/files/ocr-cr-complaint-form-package.pdf

Hawlgallada Maareynta Kiisaska ee Xafiiska Xuquuqda Madaniga ah
200 Independence Ave., SW
Suite 515F, HHH Building
Washington, D.C. 20201

U.S. Department of Justice (Waaxda Caddaaladda, DOJ), Qaybta Xuquuqda Madaniga
WEBSITE: https://civilrights.justice.gov

DOJ QAYBTA XUQUUQDA MADANIGA CABASHADA (online):
https://civilrights.justice.gov/report

FOOMKA CABASHADA ADA (boostada):
www.ada.gov/file-a-complaint

950 Pennsylvania Ave., NW
4CON, 9th Floor
Washington, D.C. 20530

*Si aad u hesho nuqulkii ugu dambeeyay ee daabacaaddan, booqo **dcyf.wa.gov/publications-library.** Si aad u hesho nuqullo bilaash ah oo qaab kale ama luqad kale ah, fadlan la xiriir Xiriirka Muwaadiniinta ee DCYF adigoo wacaya 1-800-723-4831 ama iimayl ugu dir **communications@dcyf.wa.gov**.*

DCYF PUBLICATION ADM_0040 SM (10-2026) Somali